

Barnaamijka Caawinta ee Bullaacada dhinaceeda



**Seattle
Public
Utilities**

iyada oo lala kaashanayo



**Seattle
Office of Housing**


Wax lacag
bileed ah oo la
iska qaadiyo
ma jiraan

Bulaacada geeskeeda ma jabtay? Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo kharashka dayactirka degdega ah?

La xidhiidh Xafiiska Guriyeynta ee Barnaamijka Dayactirka Guriga (Office of Housing's Home Repair Program) si aad wax badan uga barato oo aad u dalbato.

- 206-684-0244 • HomeRepair@seattle.gov
- www.seattle.gov/utilities/YourSideSewer

Mulkiilayaasha
Seattle ee
dakhligooda u
qalma waxaan



*Bullaacadaha dhinacada

TUUBADA BULAACADA
MAS'UULIYADDA

Hantida gaarka ah

Mulkiilaha hantiya
mas'uuliyadiisa*

Mas'uuliyadda SPU

Waa maxay bulaacad dhinaceed? Ma inaan dayactiraa?

Haddii aad guri ku leedahay Seattle, waxaad leedahay bullaacadaha dhinaca (sidoo kale loo yaqaan tuubada bulaacada) bulaacada dadweynaha. Bullaacada dhinaceeda waxay ka qaadaysaa biyaha wasakhda ah saxankaada alabta lagu dhaqo, musqushaada iyo bullaacadahaaga, waxayna biyhaas geenaysaa bulaacada dadweynaha ee wadada.

Sideen ku ogaan karaa in bulaacada dhinaceeda ay jabtay?

Sawir koodka QR-ka ama gal www.seattle.gov/utilities/YourSideSewer si aad u aragto Hagaha Dhibaataada Bullaacadahaaga.

Sideen barnaamijkaan ugu qalmi karaa?

- Waa inaad ku nooshahay guri aad leedahay ee ku yaal magaalda Seattle
- Waa inaad haysataa bulaacad dhinaceed ay jaban tahay ama duntay oo u baahan dayactir degdega ah
- Waa inaad buuxisaa tilmaamaha dakhliga ee hoos ku qoran



Tilmaamaha Dakhliga ee 2021*

Tirada Qoyska	Dakhliga sanadlaha ah (canshuurta ka hor)	Tirada Qoyska	Dakhliga sanadlaha ah (canshuurta ka hor)
1 qof	\$63,350	4 qof	\$90,500
2 qof	\$72,400	5 qof	\$97,750
3 qof	\$81,450	6 qof	\$105,000

* Na soo wac si aad u ogaato tilmaamaha u-qalmitaanka ee ugu dambeeso